

MAANSADI

TIMACADDE

Said M. M. Shire

Ururintii

Boobe Yuusuf

iyo

Saalax Jaamac

Luulyo

1978

Xamar

T I M A C A D D E

(1920kii-1973kii)

" GEERAAR RAAGIYO DHUUXIYO
SAYIDKII GAALADA LAAYIYO
GUDDOONSHII IMA WUURIYO
GEESIGII QOWDHAN DUCAALIYO
QAMMAANBUU KU GAMMURMAY
GUURTIDII XIKMADDII
GOD YAQAAN WAX KA SHEEGA
GAHAYRKII DABADEED
NINKII GUUDKA GADDAABAA*
GEYIGA CABWA KU KOOL."

Dallaayad, Hargeysa.

*Timacadde.

T U S M A D A.

<u>QAYBTA</u>	<u>BOGGA.</u>
I. AFEEF	3
II. MAHADCELIN	4
III. HORDHAC	5
IV. GOGOLDHIG	6
V. <u>DAD YAQAANNAY BAA YIDHI</u>	
1. Axmed Aw Aadan	11
2. Xaaji Cabdi Ducaale	13
3. Cali Ibraahin Idle	14
4. Cabdillaahi Qarshe	15
5. Cali Cilmi Afyare	16
6. Xuseen Aw Faarax	19
VI. <u>BILOWGII GABAYGAA XORNIMODOONKII.</u>	
1. Qalanjo	20
2. Tuke	21
3. Dadabgal	21
4. Eedaad	22
5. Kirmiici	24
6. Mudmud	24
7. Naahir	26
8. Tollaay	29
9. Taleex	30
10. Kala qaayo fogaa	31
11. Gabbato	32
12. Arbacadii	34
VII. <u>NADAXBANNAANIDII SIYAABADEED & FOOF HABOWGII</u>	
<u>GOBANNILADA.</u>	
1. Kaana siib, kaana saar	35
2. Mahadnaq Eebbe	40
3. Aburriin	43
4. Socdaal	46
5. Geesida Madas - Lamuumba	50

6. Murugo	55
7. Madax geel ah	58
8. Wadaadkii	59
9. Wanaaggii bukooday	60
10. Buul-dugeed	61
11. Gunaad	62
12. Dhaqdhaqaaq	64
13. NFD	66
14. Hablihii	67
15. Dhismaha Barlamaan	71
16. Saalax Waate	73
17. Abraha	76
18. Gorayacawl	77
19. Dhoobada Hawaas	79
20. Qabyo	80
21. Gama'diid	82
22. Dix dhagaxeed	85
23. Hulumbe	88
24. Derder	89
25. Ganaax Eebbe	90
26. Goobyaal	92
27. Berigii Gumeysiga	95
28. Weligeed degimeyso	95

VIII. XILLIGII KACAARTA.

1. Rabaab	97
2. Dhunkaæl	100
3. Tusbax Go'ay	101
4. Hawaara	104
5. Masaajidka Hargeysa	108
6. Dhagaxtuur	112
7. Canaan shicib	115
8. Soo dhawayn Siyaad	119
9. Guubaabo Kacaan	124
10. Aqoon	126
11. Qodaxdii Qarbiga	128
12. Seetadii	130
13. Daartii	132
14. Hambalyaynta Oktoobar	136

AFEEF

Buuggan oo aanu bilownay bishii Diisambar 1975kii, waxaanu intii kaanshahayaga iyo awooddayadaba ku jirtey ku soo ururinnay Maansadii Cabdillaahi Suldaan. Waxa hubaal ah inaanaan buuggan ku dhammaystirin maansadii Timacadde. Dhammaystir daayoo, badhna kamaanu qorin. Kaensho umaanu helin inaanu tagno meelihii laga heli lahaa maansada Timacadde. Waxaanu hubnaa in haddaanu tegi lahayn Hargeysa ama Jabuuti, aanu idin soo hordhigi lahayn shaqo intan ka ballaadhan.

Gabayada waxaanu ka qornay cajalado ama dad qaybsanaa. In wax laga tegay iyo wax lagu darayba way suurtoowdaa, balse intii tamartayada ahayd waanu hufnay.

Mar hore ayaanu buuggan idin soo hordhigi lahayn. ayaan darro anagoo 16kii maerso, 1977kii, gegida Banaadir ciyaar kubbadeed ku daawanayna ayaa shandad gabayadii ku jireen oo baabuurka noogu jirtey inta daaqad la jebiyay lala baxay. Mar labaad ayaanu haddana dib u qornay.

Wixii goldaloolo buuggan ama ururintan ka soo baxa yaan loo aanayn gabayaaga, haseyeeshee ha loo qaato kuwo ka dhashay baradka aanu qoraalka ku nahay iyo raad raac sugan oo aanaan helin.

Waxaanu akhristayaashayada ugu bishaareynaynaa inaanu Qormo labaad ururin doonno si aanu ugu dhawaanno dhammaystirka maansadii Timacadde.

Akhristayaashayada waxaanu magan uga nahay inay noo soo coraan wixii: sixid, talo, gabay, taariikho ama wax kaleba AY HAYAAAN si aanu qormada labaad ugu soo darro. Kol haddii afkeennii dhawaan la qoray, suugaanteennii iyo taariikh-dii maansayahankeennuba innaga ayay innagu jirtaaye aan isu soo gudbinno.

Waxaanu idin ogeysiinaynaa in qaybta ugu danbaysa ee buuggan oo aanu ku magacawney "Ereyfurka" gabayada aanu sharaxnay: meelaha, magacyada ama wixii kale ee aanu is nidhi fasiraad ayay u baahanyihiin.

Idinkoo qoraysan waxaanu idin leenaday
akhristayaashayada.

BOOBE & SAALAX JAAFIIC

10.7.1978. ✓

MAHADCELIN.

Waxa laga yaabaa inay dad badan oo aanaan is-ogeyni isku dayeen ama hiygaba ku hayeen inay ururiyaan maansadii Cabdillaahi Suldaan. Markaanu qabankaabada hawshan bilownay waxaanu la kulannay Rashiid Sheekh Cabdillaahi oo mid ka ahaa raggii ku talo jirey inay hawshan dhexgalaan, haseyeeshee aanay u suurtoobin.

Mahad aanaan awoodi karin inaanu hello ereyadii aanu ku sifayn lahayn waxaanu u naqaynaa Daahir Cabdillaahi iyo Aadan Weris oo na siiyay gabayo badan, gabayaagana ay saaxiib ahaayeen.

Waxaanu mahad ballaadhan u celinaynaa: Cabdikariim Xaaji Ducaale (Maamulaha Raadyoo Hargeysa) oo si hagar la'aana noo siiyay gabayadii Timacadde, Ibraahin Xaaji Cawad (Khoodi) oo gabayada qaarkood na siiyay, Cabdi Muxumed Diiriye oo gabayo door ah Jabuuti nooga soo direy, Cabdillaahi Qarshe oo had iyo jeer noo la heegganaa Taariikhdii iyo shakhsiyaddii Timacadde, Axmeddey Hadaafoow oo gabayo na siiyay, Rashiid Sheekh Cabdillaahi, Siciid Jaamac Xuseen, Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) iyo Axmed Cabdillaahi Xareed (Weerar) oo in badan talo iyo tilmaanba na siiyay, shakhsiyaddii gabayaagana wax nooga sheegay, Nuux Maxamed Cabdille oo aad nooga caawiyey duubidda gabayada, Sacdiya Yuusuf Ducaale (Baarcad) iyo Sacdiya Cabdillaahi Cali oo noo garaacay.

Ugu danbayn waxaanu mahad ballaadhan u naqaynaa intiinnii na caawisay - si ay noo caawiyeenba - ee halkan ay noo suurtoobi weyday inaanu magacyadooda ku xusno.

BOOBE & SAALAX JAAMAC

5.6.1978,

Xamar.